

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

Speaker	Text	Time
Diane Atwood	Salaan, magaceyga waa Diane Atwood. Fiidiyowgaan wuxuu ku siin doonaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dhageysiga maanta, iyo sidoo kale xuquuqda aad leedahay iyo mas'uuliyad ku saaran adiga, sidaas darteed si wanaagsan u dhageyso iyo ogow in aad xor u tahay in aad qoratid waxa aad dooneysid in aad xasuusatid.	<b>0:12</b>
Diane	Waxaa ila joogoto Garsoore Maria Woodman oo ka tirsan Maxkamadda Dagmaada Maine Salaan Garsoore Woodman.	<b>0:21</b>
Diane	Waxyaabo badan ayaa isbaddalay taasoo ugu wacan COVID-19, mid ka mid ahna wuxuu ku saabsan yahay sida maxkamadda u qabato dhageysiyada. Dhageysiga maanta waxaa lagu qaban doonaa fiidiyo si loo ilaaliyo ammaanka dadka ka soo qeybgala. Garsoore, dhinacyada maxay ka filan karaan dhageysiga maanta?	<b>0:32</b>
Judge Woodman	Maanta, dhinacyada waxay fursad u heli doonaan in ay xal ka gaaraan kiiskooda marka ay la hadlaan wakiilka Gobolka, ha ahaado xeer ilaaliyaha dagmada, sarkaalka boliiska, ama xattaa isla sarkaalka ku siiyay tigidhka. Waajib kugu ma aha in aad la hadashid sarkaalka, balse haddii ay go'aan ku gaaraan in ay sidaas sameyaan, waa fursad in kiiska lagu xalliyo heshiis.	<b>0:50</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

Diane	Aniga waxaan fahamsanahay in haddii eedeysanaha uu doorto in uu la hadlo sarkaal, labadaba waxay geli doonaan qolka internetka, kaddibna wada hadaladooda waxay ahaan doonaan kuwo iyaga u gaar ah.	<b>0:59</b>
Diane	Haddii ay awood u yeeshaan in ay gaaraan heshiis, waxaa dib loogu soo celin doonaa qolka dadweynaha si ay ula hadlaan garsooraha, oo su'aal kaa weydiin doono heshiiska iyo hubsan doono in uu waafaqsan yahay sharciga.	<b>1:05</b>
Judge Woodman	Haa, taasi waa sax. Haddii qofka uu doorto in uusan la hadlin sarkaal, ama haddii aan la gaarin go'aan, markaas waxaa dhici karto in dacwadda lagu dhageysto fiidiyow goor dambe maanta.	<b>1:14</b>
Diane	Mahadsanid, Garsoore Woodman. Iminka ka-qeybgaleyaasha dhageysiga waxay adiga si toos ah kaa maqli karaan xuquuqda ay leeyahiin iyo mas'uuliyadda saaran.	<b>1:24</b>
Judge Woodman	Soo dhawow. Maanta waxaan halkaan u joognaa maxaa yeelay waxaa lagaaga yeeray maxkamadda	<b>1:40</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

	<p>halkaas oo Gobolka ay kugu soo dacweysay in aad jebisay sharciga baabuurta. Bacdamaa jebinta sharciyada baabuurta ay tahay jebin madani ah, iyo aysan ahayn dambi, maxkamadda ma kuu magacaabi karto qareen adiga, ma jirto xaq loo leeyahay in dacwadda ay dhageysato guddi, mana dhici doonto in ciqaabtaada noqoto xabsi.</p>	
Judge	<p>Marka la gaaro dhageysiga dacwadda, culeyska caddeynta wuxuu saaran yahay Gobolka, waxaana laga rabaa in ay soo bandhigto caddeyn xoog badan. U badnaanta waxaa loo jeedaa in ay u badan tahay in adiga aad geysatay jebinta sharciga.</p>	<b>1:50</b>
Judge	<p>Xattaa haddii aadan haysanin qareen kuu dooda inta ay socoto dacwadda, qof kasta oo iska soo xaadiriya maxkamadda waxaa looga baahan yahay in uu raaco Sharciyada Dacwadaha Madaniga Maine iyo Sharciyada Caddeynta Maine.</p>	<b>2:00</b>
Judge	<p>Waxaan rabaa in aan kugu adkeeyo in aysan waajib kugu ahayn adiga in aad la hadashid xeer ilaaliyaha ama wakiilka hirgelinta sharciga. Hase ahaatee, haddii aad dooratid in aad iyaga la hadashid, aadna awoodid in aad heshiis ka gaartid dacwadaada, Aniga waxaan labadaba kala hadli doonaa tafaasiisha ku saabsan heshiiskaas si loo hubsado in ay u hoggaansan yahay sharciga.</p>	<b>2:15</b>
Diane	<p>Haddii aad heshiis la gaartid Gobolka, waxaa jira labo arrin oo laga yaabo in aadan la soconin adiga,</p>	<b>2:23</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

	goorta la gudbiyo eedeynta iyo goorta la gudbiyo eedeynta la soo raaciyo kharashka. Marka la soo gudbiyo eedeyn, ma aha xukun la gaaray mana ka muuqan doonto taariikhda shattiga waddaha.	
Diane	Haddii la soo gudbiyo eedeyn, taasii macnaheeda waxay tahay in eedeyntaas la fasixi doono, mana bixin doontid ganaax, haddiiba Gobolka uusan kiiskaada dib ugu soo celinin maxkamadda muddo 180 maalin gudahooda. Waxaa dhici karto in Gobolka uu dib u soo celiyo kiiskaada, tusaale ahaan haddii aad geysatid qodobka jebinta sharciyada baabuurta ama haddii aad geysatid fal dambiyeed. Waxaa dhici karto in heshiiska kaa dalbado in aad fullisid sharuudaha qaar, sida u adeegidda bulshada.	<b>2:35</b>
Diane	Haddii la soo gudbiyo eedeyn <b>lana soo raaciyo shardiga kharashka</b> , taasii macnaheeda waxay tahay in ay waajib kugu tahay in aad bixisid khidmadaha qaar si kiiskaada loo fasaxo. Haddii aan la bixinin khidmadaha muddo 30 maalin gudahooda, maxkamadda ayaa dhageysan doonto kiiska. Haddii aad bixisid khidmadaha muddo 30 maalin gudahooda, adiga oo buuxiya dhamaan sharuudaha kale, iyo haddii Gobolka uusan kiiskaada ku soo celinin maxkamadda muddo 180 maalin gudahooda, waa la kala diri doonaa waxa laguugu soo eedeyay.	<b>2:50</b>
Diane	Haddii aad ogolaatid waxa laguugu soo eedeyay, ama, haddii garsooraha uu go'aan ku gaaro kaddib	<b>2:57</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

	marka dacwadda la dhageysto in la jebiyay sharciga, garsooraha wuxuu eedeysanaha saari doonaa ganaaxa ku habboon.	
Diane	Kiisaska qaar, maxkamadda waxay kaloo ammar ku bixin kartaa in qofka laga xannibo shattiga. Xattaa haddii maxkamadda aysan ammar ku bixinin in lagaa joojiyo shattiga, go'aanka maxkamadda gaarto waxaa loo gudbin doonaa Xogeyaha Gobolka. Xogeyaha Gobolka wuxuu ku dhaqaaqi karaa in uu qaado talaabo maamul, sida xanibaadda shattiga, taasoo ka dhallata go'aanka maxkamadda gaartay.	<b>3:13</b>
Diane	Haddii wakiilka Gobolka uusan u imaanin kiiska, waxaa dhici karto in kiiskaada la fasaxo. Garsooraha ayaa ku ogeysiin doono haddii taasi ka dhacdo kiiskaada.	<b>3:18</b>
Diane	Aan ku noqono Garsoore Woodman, waxay kuu sharaxi doontaa xuquuqda kale aad leedahay.	<b>3:21</b>
Judge	Aniga waxaan kaa rabaa in aan kula socodsiiyo qaar ka mid ah xuquuqda aad leedahay maanta. Kow, Gobolka ayuu culeys ka saaran yahay caddeynta kiisgaan. Taas macnaheeda waxay tahay in ilaa Gobolka ka caddeeyo waxa laguugu soo eedayay, soona bandhigo caddeyn waafi ah, waxaad tahay qof saliim ka ah waxa laguugu soo eedayay.	<b>3:31</b>
Judge	Labo, waxaad xaq u leedahay in aad iska aamustid. Taasi macnaheeda waxay tahay in adiga aad	<b>3:40</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

	dooran kartid in dacwadaada la dhageysto iyo in aadan marqaati furin. Hase ahatee, waxaa dhici karto in garsooraha uu go'aan ka gaaro go'aanka aad gaartay adiga in aadan marqaati furin.	
Judge	Saddax, waxaad xaq u leedahay in maxkamadda dhageysato dacwadaada. Taas macnaheeda waxay tahay in adiga aad xaq u leedahay in aad xaadir ahaatid, si aad su'aal u weydiisid marqaatiyada Gobolka, in aad soo bandhigtid marqaatiyadaada iyo caddeynta, iyo, haddii aad dooneysid, in aad naftaada marqaati furtid.	<b>3:50</b>
Judge	Haddii maxkamadda dhageysato dacwadaada, waxaa jirta qeyb ka tirsan sharciga oo lagu dabaqo kiisaska la dadajiyo. Wuxuu leeyahay waa in la ogolaado natiijadaha ka soo baxa qalabka cabbirka xawaaraha loo adeegsado raadaarka ama qalab kale oo lagu cabbiro xawaaraha sida in uu yahay xawaaraha uu ku socdo baabuurka loo haysto dacwadda jebinta sharciyada u dagan baabuurta.	<b>4:05</b>
Judge	Marka si fudud loo soo jeediyo, tan macnaheeda waxay tahay in Gobolka looga baahan yahay in sarkaalka adiga ku joojiyay uu caddeeyo in	<b>4:25</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

	<p>baabuurkaada uu ahaa midka xawaarahiisa lagu cabbiray qalab si sax u shaqeeyo. Haddii Gobolka caddeeyo in sharciga uu ka rabo garsooraha in uu ogaado in adiga aad ku socotay xawaarahaas, haddii aadan soo bandhigin caddeyn waafi ah oo leysku halleyn karo oo ka soo horjeedo.</p>	
Diane	<p>Haddii garsooraha uu ammar ku bixiyo ganaax, waxaa soo raaci kara korsaar ama khidmado, kaddibna garsooraha ayaa kuu sheegi doono xisaabta buuxda ee lagaa rabo in aad bixisid. Inta badan kiisaska, garsooraha wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro ganaaxa ku haboon. Kiisaska qaar, garsooreyaasha awood uma laha in ay yareyaan ganaaxa ay waajib ka dhigtay Sharci Dajinta.</p>	<b>4:41</b>
Diane	<p>Sharciga wuxuu qabaa in ganaaxa baabuurta lagu bixin karo muddo 30 maalin gudahooda laga bilaabo taariikhda la saaro qofka. Haddii aadan ganaaxa ku bixin karin waqtiga lagu qabtay, ogeysii garsooraha adigoo ka codsada in lagu siiyo waqti dheeraad ah aad ku bixisid ganaaxa.</p>	<b>4:52</b>
Diane	<p>Haddii aadan bixinin ganaaxa marka loo baahan yahay in aad bixisid, waxaa isla markiiba lagaa xannibi doonaa shattiga aad ku waddid baabuurka.</p>	<b>5:00</b>

## Qoraalka Fiidiyowga

### Dhageysiyada Lagu Qabto Xafiiska Jebinta Sharciyada

Diane	Haddii aad wadiid baabuur waqti oo lagaa xannibay shattiga, waxaa dhici karto in lagu soo xero kaddibna laguugu eedeeyo in aad Wadday Baabuur Goor Lagaa Xannibay Shattiga. Taasi waa gaf culus, sidaas darteed waxaa aad muhiim u ah in aad ganaaxa ku bixisid waqtiga lagu qabtay.	<b>5:11</b>
Diane	Aan u jeesano Garsooraha Woodman si aan u maqalno gabogabada warkeeda.	<b>5:14</b>
Judge	Maxkamadda waxay baddashay sida ay u fulliso qaar ka mid ah dhageysiyada si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka dhamaan inta ku lugta leh, hase ahaatee in dhageysi lagu qabto fiidiyow sinna ma yareyso xuquuqda aad leedahay.	<b>5:23</b>
Judge	Fiidiyogaan wuxuu soo taxaa xuquuq badan uu adiga ku siiyay Dastuurka iyo Sharciyada u Dagsan Mareykanka iyo Gobolka Maine. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan waxa lagu sheegay fiidiyowgaan, ama ku saabsan dhageysiga maanta, Aniga waxaan kugu dhiirigelinaa in aad maxkamadda weydiisid marka magacaada loo yeero, ama marka kiiskaada la waco si loo dhageysto.	<b>5:40</b>
Judge	Waad ku mahadsan tahay waqtiga iyo feejignaanta aad siisay macluumaadka laga hadlay maanta. Fiyooobi.	<b>5:45</b>